



Musharixiinta oo 4 kursi looga qoondeeyay Guddiga Waxbarashada PPS

Guddiga Waxbarashada ee Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay yeelan doontaa ugu yaraan saddex xubnood oo cusub oo laga bilaabo sannad dugsiyeedka 2019-20. Afar kursi ayaa lagu kala baxayaa inta lagu jiro doorashada gaarka ah ee, Talaadada, Maajo 29.

Waqtigii loo qabtay in lagu soo gudbiyo in u tartanka kursigu wuxuu ahaa Maarso 21, iyada oo 10 qof ku dhawaaqeen in ay musharixiin ka yihiin afarta goobood ee doorashadu ka jirto. Kaliya hal xubin oo ka tirsan guddiga xilka haysta ee afarta goobood ee doorashadu ka jirto ayaa go'aansaday in uu dib isku soo sharaxo doorashada.

Halkan waxaa ku qoran musharixiinta xil afar-sanno ah ka raadsanaya guddiga (riix magaca si aad u aragto foomka gudbinta ee musharaxa; riix goobta si aad u aragto khariidada goobta ee agaasimuhu matalayo):

Goobta 1: Laba musharax ayaa u tartamaya in ay beddelaan Julie Esparza Brown, oo sidoo kale ah guddoomiye ku xigeenka guddiga. Waxay kala yihiin [Andrew Scott](#) iyo [Jeff Sosne](#).

Goobta 2: Kursiga uu hadda ku fadhiyo Paul Anthony wuxuu leeyahay saddex musharax: [Shanice Brittany Clarke](#), [Carlos Jermaine Richard](#) iyo [Michelle A DePass](#).

Goobta 3: [Amy Kohnstamm](#) oo hadda xilka haysa ayaa u tartamaysa kursigeeda. Waxaa jira oo ay leedahay laba qof oo la tartamaya [Deb Mayer](#) iyo [Wes Soderback](#).

Goobta 7: Labada musharax ee raadinaya in ay beddelaan Mike Rosen: [Eilidh Lowery](#) iyo [Robert Schultz](#).

Warqadaha cod bixinta ee loogu talagalay doorashooyinka waxaa boosta lagu diri doonaa Maajo 1, iyo ka dib maalinta doorashada ee Maajo 29, natiijooyinku waa in ay noqdaan kuwo la aqoonsan karo muddo aan ka dambeyn Juun 10. Kulamada guddiga ee loogu talagalay 2019-20 waxay bilaabmi doonaan Luulyo.

Cod bixiyayaashu waxay fursad u heli doonaan in ay musharixiinta dhageystaan Khamiista, marka Isbahaysiga Cod bixiyayaasha Haweenku 'League of Women Voters' kulan bilaabmaya 6:30 galabnimo ku qabtaan qolka guddiga oo ku yaala xafiiska degmada, 501 N. Dixon St. Fiidiyowga kulanka waxaa laga heli doonaa [Website-ka Isbahaysiga Cod bixiyayaasha Haweenka](#).

Saddex kursi ee kale ee guddiga ee – Goobta 4 oo ay xilkiisa hayso Guddoomiyaha Rita Moore, Goobta 5 oo uu xilkiisa hayo Scott Bailey iyo Goobta 6 oo ay xilkiisa hayso Julia Brim-Edwards – waxay doorashadoodu imaan doontaa 2021.

